Immigratie- en Naturalisatiedienst
Ministerie van Justitie en Veiligheid

Oggolaasho joogitaan magangelyo wakhti xaddadan: maxaay ku tareysaa adiga?

Waxaa lagu siiyay oggolaasho joogitaan magangelyo wakhti xaddadan. Taasi waxa ay ku taalaa go'aanka aad ka heshay Adeegga Migreshanka iyo Dhalasho Qaadashada (IND). Marka aad heysato oggolaasho joogitaan waxaad leedahay xuquuq iyo waajibaad. Buuggan warbixinta waxa aad ka heleysaa wargelin ku saabsan xuquuqdaas iyo waajibaadkaas.

Oggolaasho joogitaan magangelyo wakhti xaddadan
Marka aad oggolaasho joogitaan leedahay waxaad kartaa in aad:
- muujiso in aad degganaan karto Nederland;
- caddeyso yaa tahay. Oggolaashadaada joogitaan waa caddeyn aqoonsi xitaa.

Oggolaashada muddo xaddadan ayeey hawl gal tahay. U kuur gal macluumaadka ku yaal oggolaashadaada joogitaan. Ma qaldan yihiin macluumaadkaada? Xagga hoose ee buuggan warbixinta waxaa ku yaal markaa waxa ay tahay in aad sameeyso.

Macluumaadka ku yaal oggolaashada joogitaan magangelyo
Macluumaadka soo socda ayaa xagga hore kaga yaal oggolaashadaada joogitaan:
1 Magaca: magacaada dambe iyo magacyadaada hore (magaca reerka iyo kaada)
2 Taariikhda dhicista: oggolaashada waxa uu hawl gal yahay ilaa iyo taariikhdaas
3 Rugta iyo taariikhda la soo saaray: waa rugta iyo taariikhda adiga lagu siiyay oggolaashada joogitaan
4 Nooca dokumentiga: tirada III macnaheeda waa in lagu jeedo oggolaasho joogitaan magangelyo wakhti xaddadan
5 Waxyaabo gaar ah: halkan waxaa ku yaal xuquuqdaada joogitaan

Macluumaadka soo socda ayaa xagga dambe kaga yaal oggolaashadaada joogitaan:
6 Taariikhda- iyo rugta dhalashada, qarannimada iyo jinsiga (lab ama dhiddig)
7 Waxyaabo gaar ah: xuqquqda shaqo.
Oggolaashadaada joogitaan waxa ku yaal in aad Nederland ka shaqeyn karto.
8 Xuquuqda joogitaan taariikhda ay bilaabatay: ka bilow taariikhdaa waxa aad xuquuq u leedahay in Nederland aad joogto.

9 V-nambarka: waa 10-tiro ah V-namabrka oo xagga hoose oggolaashadaada joogitaan kaga taal.
Nambarka waxa uu ka dambeeyaa xarfaha VNR. V-nambarkaada waxa kale ook u yaalaa warqadaha aad ka hesho IND-da.

Maxaa hadda ay tahay in aad sameyso?

- Soo qaado oggolaashadaada joogitaan celina Caddeyntaada Shaqsiga Ajaanibka (W-dokumentiga). Mararka qaar isla marka lagu siiyo go'aanka keddib ayaa lagu siinayaa oggolaashadaada joogitaan. Ma lagu siin miyaa weli oggolaashadaada joogitaan? Dhowr usbuuc gudahood waxa aad warqad ka heleysaa IND-da. Warqadda waxaa ku yaal goorma iyo daaqadda qaabiladee oo IND ayaad ka soo qaadan kartaa oggolaashadaada joogitaan. Marka aad soo qadaneyso oggolaashadaada joogitaan waa in aad Caddeyntaada Shaqsiga Ajaanibka aad celisaa.
- Iska diiwaan geli degmada (dowladda hoose). Waa qasab in aad iska diwaan gelisaa Diwaanka Aasaasiga Dadka (BRP). BRP-ga waxaa lagu xafidaa macluumaadka dadka oo qof waliba oo deggan Nederland. Mararka qaar waxa ay degmada ku diiwaan gelineysaa isla marka aad go'aanka hesho. Miyaadan weli is diiwan gelinin? Markaa la xiriir degmadaada. U kuur gal in magacaada iyo taariikhda dhalasho si fiican looga hawl galay. Inta dokumenti ah oo aad heli karto hore u sii qaado, sida warqad dhalasho, mid nikaax iyo caddeyn aqoonsi. Diwaan gelin keddib waxaa lagu siinayaa Nambarka Adeegga Muwaadinka (BSN). Kaasi waa nambar qof waliba u gaar ah oo dadka oo dhan ee ku qoran BRP-ga leeyihiin. Waxa aad u baahan tahay BSN mar kasta oo aad dowladda la xiriireyso. Ka fiirso warbixin dheeraad ah oo ku saabsan BRP iyo BSN barta www.rijksoverheid.nl.
  Ama wac 1400. Ma ka qoran tahay BRP-ga mana rabtaa in aad guurto? Markaa waa in aad taasi la socodsiisaa degmadaada. Degmada waxa ay BRP-ga ka beddeleysaa macluumaadka ciwaankaada.
- Sido (wado) oggolaashadaada joogitaan. Oggolaashadaada joogitaan waa caddeyn aqoonsi xitaa. Qof waliba oo 14 sano jir ah am ka da' weyn Nedrland gudaheeda waa in uu caddeyn karo yuu yahay. Taasi waxa lagu jeedaa in aad tusin karto boliiska oggolaashadaada joogitaan. Ama qof kale oo nabad guud ilaaliye ah. Ganaax ayaa lagu siin karaa haddii aad caddeyn karin yaa tahay.
- Gal ceymis daryeel. Sida uu sharciga qabo waa kugu qasab in aad gashaa ceymis aasaasi ah ee khrashka caafimaadka. Halkaasi waxaa laga bixinaayaa kharashka dhakhtarka qooyska, cisbitaalka iyo farmashiiyaha. Adiga ayaa xulan kara mid ka mid ah kuwa bixiya ceymiska aasaasiga ah. Ma gashay heshiis ceymiska daryeel? Markaa waxa aad iska qori kartaa dhakhtar qooyska iyo midka ilkaha. Dhakhtarka qooyska waxa uu kuu gudbin karaa cisbitaalka haddii taa loo baahan yahay. Warbixin dheeraad ah ka fiirso barta www.rijksoverheid.nl.
  Ama wac 1400.
- La qabsashada bulshada. Sida uu sharciga qabo waa in aad la qabsashada bulshada Nederland ka sameysaa. Taasi waxaa lagu jeedaa in aad afka Nederland barataa. Waana in aad aqoon u yeelataa bulshada Nederland. Warqad taas ku saabsan waxa aad ka heleysaa Adeegga Fulinta Warbarashada (DUO). Adiga ayaa mas'uul ka ah habeynta la qabsashaadaada bulshada. La qabsashada bulshada khrash ayaa ku baxaaya. Waxa aad bulshada la qabsatay marka aad ka gudubto imtixaanka la qabsashada bulshada. Haddii aad koorso la qabsashada bulshada aad geli weyso DUO waxa ay ku siin kartaa ganaax. Ma ka yartahay da'daada 18 sano jir ama ma gaartay da'da hawlgabka sida sharciga waafaqsan? Haddii ay sidaa tahay adiga kuma quseeyo la qabsashada bulshada qasabka ah. Umana baahnid in aad koorso la qabsashada bulshada aad gasho. Warbixin dheeraad ah ka fiirso barta www.inburgeren.nl.
  Ama wac waaxda la qabsashada bulshada ee DUO: 050 599 96 00.

Maxaad hadda sameyn kartaa?

- Haddii lagu siiyaya oggolaasho joogitaan magangelyo adiga kuu shaqsi ah, waxa aad codsan kartaa isku keenista qooyska (ka soo daba safris magangelyo). Xubnaha qooyskaada oo dibadda ku sugan marka ay dhowr xujjo ka soo baxaan waxa ay u soo safri karaan Nederland. Xujjooyinka mid ka mid ah waa in aad texanaha geedi socodka codsiga aad wakhtigiisa ku bilowdaa. Taasi waxaa lagu jeedaa: saddex bilood gudahood keddib marka go'aanka oggolaashada lagu siiyay. Taasi waa mid ku quseeysa xitaa haddii (aad weli) ogeyn meesha uu qoyskaada ku sugan yahay. Texanaha geedi socodka codsiga waxa uu ku bilaabanaayaa codsiga ee awoodsiin joogitaan ku meel gaar ah (mvv) ee xubnaha qooyskaada. Codsigaan waa lacag la'aan.
  Mvv waa fiiso oo joogitaan oo saddex bilood iyo muddo ka dheer. Codsiga waxa aad ka sameyn kartaa Nederland. Taasi waxa aad u adeegsa kartaa foomka codsiga (dijitaalka ah) ee 'Codsiga awoodsiin joogitaan ku meel gaar ah – ka soo daba safrayaal magangelyo'.
  Foomka codsiga waxa aad ka heleysaa barta www.ind.nl. Shaqaalaha Hey'adda u Adeegta Qaxootiga Nederland ayaa kuugu caawini karo codsiga. Xubnaha qooyskaada xitaa waa sameyn karaan codsiga. Taasi waxa ay ka soo sameyn karaan safaradda Nederland oo dibadda ku taal.
  U fiirso! Codsigaada magngelyo ma yahay mid ka badan 3 bilood ka hor la oggolaaday? Markaa waa aad la soo daahday keenista codsiga isku keenista qooyska oo magangelyo ku saleysan. Waxaase weli aad keeni kartaa codsi isku keenis qooyska oo caadi ah. Cadsigaasi lacag ayuu joogaa. Waxaana quseeya xujjooyin ka adag kuwa taxanaha geedi socodka isku keenista qooyska ku saleysan magangelyo. Waxaa ka mid ah in lagaa rabo in aad dakhli (mushahar) kugu filan leedahay oo aad qooyskaada ku biilato. U adeegso texanaha geedi socodka foomka codsiga 'Codsiga oo ujeedadiisu tahay la joogitaan reer iyo qoys (damaan qaade)'. Foomkan waxa aad ka heleysaa barta www.ind.nl.
  U fiirso! Haddi lagu siiyay oggolaasho joogitaan magangelyo adiga oo ah xubin ka tirsan qooys magangelyo doone, ma laguu oggola in aad codsi isku keenista qooyska (ka soo daba safris magangelyo) sameeyso. Waxa aad sameyn kartaa codsi isku keenista qooyska oo caadi ah.
- Waa aad shaqeyn kartaa. Shaqa bixiyahaada uma baahna in uu taasi u heysto oggolaasho shaqo gelin (TWV). Waxa aad u baahan tahay in akkonto bankiga leedahay si lagugu soo shubi karo mushaharka. Bankiga aad rabto ayaad akkonto ka furan kartaa. Hey'adda Fulinta Ceymiska Shaqaalaha (UWV) ayaa warbixin dheeraad ah shaqada kaa siin karto.
  Eeg barta: www.uwv.nl/particulieren ama wac UWV-da: 0900 9294.
- Waxaa aad raadsan kartaa meel aad degto. Xubinta Dhexe ee Magangelyo Doonka (COA) ayaa kuugu caawini karo sida aad ku heli lahayd meel aad degto. Waxa aad xaruunta deejinta soo dhoweyn ee COA aad ka baxeysaa marka aad guri hesho.
- Waxa aad u safri kartaa dibadda. Maadama aad leedahay oggolaasho joogitaan, waxa aad u safri kartaa dibadda tusaale ahaan fasax u aadi kartaa ama hawlgal shaqo. Waxa aad u baahan tahay basaboor aan dhicin. Taasi waxa ay quseeysaa xitaa carruurta. Haddii aadan basaboor heysan, markaa waxa aad degmadaada ka codsan kartaa basaboorka qaxootiga. Codsiga basaboor qaxooti lacag ayuu joogaa. Keddib marka aad basaboorka qaxootiga dalbato, maalmo ayaad sugeysa inta aadan soo qaadan. Waddamada qaar waxaa basaboorka dheer oo ay kaa raaban in aad fiiso heysato.
  U fiirso! Ma la oggola in aad basaboorka qaxootiga ugu safarto waddanka aad ka timid. Ma rabtaa warbixin dheeraad oo ku saabsan basaboorka qaxootiga, la xiriir markaa degmadaada. Ma dooneysaa in aad wakhti dheer aad dibadda ku maqnaato? Weydii markaa IND-da saameynta ay taasi ku yeelan karto

oggolaashadaada joogitaan magangelyo. IND-da ayaa kuu sheegi karta in loo baahan yahay tegistaada iyo soo noqoshadaada in aad ka diwaan geliso boliiska ajaanibta (AVIM).

Codsi dheereyn/codsi oggolaasho joogitaan magangelyo oo wakhti aan xaddadneyn

Oggolashadaada joogitaan waxaa ku yaal ilaa iyo taariikhda uu hawl gal yahay. Waa muhiim in aad oggolaashadaada joogitaan aad wakhtiga gudihiisa ku dheereyso. Wakhtiga gudihiisa waxaa lagu jeedaa inta uusan dhicin. Waxaa xitaa codsan kartaa oggolaasho magangelyo oo wakhti aan xaddadneyn. Taasi waxa ay macquul tahay marka wakhtiga uu dhacaayo oggolaashadaada joogitaan magangelyo soo dhowaado. Ma rabtaa in oggolaashadaada joogitaan magangelyo wakhtiga xaddadan aad dheereyso? Ama ma rabtaa in aad codsato oggolaasho joogitaan magangelyo oo wakhti aan xaddadneyn? Markaa u adeegso taasi foomka codsiga ee 'Codsiga dheereynta oggolaasho joogitaan magangelyo wakhti xaddadan; ama Oggolaasho joogitaan magangelyo wakhti aan xaddadneyn; ama Oggolaasho joogitaan-EU degganaa muddo dheer'. Foomka waxa aad ka heleysaa barta www.ind.nl. Ha soo qadimin codsigaada wakhtigiisa ka hore.
Waa in aad codsigaada keentaa inta uu oggolashadaada joogitaan weli hawl gal yahay. Waxaa ugu fiican 4 usbuuc ka hor dhicitaanka. Adiga ayaa mas'uul ka ah in aad wakhtiga gudihiisa ku dheereysato oggolaashadaada joogitaan ama aad ku codsato oggolaasho joogitaan oo wakhti aan xaddadneyn.

Dib ugu noqosho waddanka aad ka timid oo kaba dambeys ah.

Ma ka fekertaa in aad si kaba dambeys ah dib ugu noqoto, markaa waxa aad talo iyo cawinaad ka doonan kartaa Hey'adda Migreshanka ee Nederland (NMI). Ka fiirso warbixin dheerad ah barta www.nmigratie.nl ama wac 030 236 42 45.

Lumis (halloow), xadis, qarribnaan ama macluumaad qaldan

- Ma kaa lumay ama ma lagaa xaday oggolaashadaada joogitaan? Markaa waa in aad marka hore ashtako lumis ama xadis ka geysaa boliiska. Ashtakada marka aad geyneyso waxa aad u baahan tahay v-nambarkaada. Waxa aad taasi ka heleysaa warqadaha IND-da. Boliiska waxa ay ku siinayaan koobi qoraalka-dacwad oo la timbareeyay. Ka codso markaa keddib IND-da beddel oggolaashada joogitaan. Codsiga beddelka waxa aad raacineysaa koobi qoraalka-dacwad.
- Ma qarribmay oggolaashadaada joogitaan? Haddii uu oggolaashadada joogitaan si daran uu qarribmay, uma adeegsan kartid caddeyn aqoosi ahaan. Markaa waa in aad IND-da u dirtaa codsi beddelaad. Codsiga beddelaad waxa aad raacineysaa koobi dhanka hore iyo kan dambe ee dokumentiga joogitaan ee qarribmay. Marka aad soo qaadaneyso dokumentiga joogitaan ee cusub waa in aad geysaa midkii qarribmay.
- Ma ku yaalaan macluumaad qaldan oggolaashadaada joogitaan? IND-da waxa ay adeegsaneysaa macluumaadka laga xigtay Diwaanka Aasaasiga Dadka (BRP). Taasi awgeed waa in aad marka hore la xiriirtaa degmadaada. Iyaga ayaa baaraaya in macluumaadkaada si fiican uga qoran yihiin BRP-da.
  Haddii ay macluumaadkaada BRP-da ay qaldan yihiin, waa in marka hore la beddelaa. Markaa keddib un baad IND-da ka codsan kartaa beddelaad dokumentiga joogitaanka.
- Sidee ayaad uga soo weydiineysaa IND-da codsi beddelaad? Kaasi u adeegso foomka 'Codsiga beddelista ama cusboneysiinta dokumentiga ajaanibta' ee barta www.ind.nl. Codsiga oggolaasho joogitaan cusub lacag ayeey joogtaa.
  Lacagta waxa aad bixineysaa marka aad oggolaashada cusub soo qaadaneyso.

Ma qabtaa weli su'aalo?

Booqo website-ka IND-da, www.ind.nl ama wac nambarka guud ee IND. Nambarka telefoonka waa 088 043 04 30. IND-da waxa ay diyaar kuu yihiin isniinta ilaa iyo jimcaha ka bilow 09.00 ilaa iyo 17.00. Marka aad dibadda ka soo waceyso adeegso: +31 88 043 04 30.

Soo saarista qooraalkan waxa iska leh:
Immigratie- en Naturalisatiedienst (IND) | www.ind.nl

Nuxurka soo saarista qoraalkan wax xuquuq ah kama dhaxleysid. Haddi tarjumista ay keento maco kala duwan, markaa macnaha afka nederlandka ayaa la qaadanayaa. Soo saaristan waa la soo xigan karaa hadii la tilmaamo halka laga keenay.